

Waa bannaan tahay in la weydiisto faa'iidooyinka, miraha iyo miraha bislaaday markii duridda xukunka kaddib iyo magdhowga dhibaata ee dhalatay xukunka ka dib.

## Qodobka 236aad

dhicidda weydiinta iyo wax ka qabidda aan la cusboonaysiin

waxaa loo qaadanayaa in laga tanaasulay weydiinta iyo wax ka qabidda ee ayna Maxkamadda darajada koowaad xukunkeeda ku oggolaan, haddii aan si cad loogu cusbooneysiin Rafcaanka.

## Qodobka 237aad

Qaabka looga qayb gelaayo Rafcaanka iyo muddadiisa

Ka qayb galka rafcaan wuxuu ku imaamayaa qaabka iyo habka loogu dhaqmo Maxkamadda darajada koowaad.

## Qodobka 238aad

Oggolaansho la'aanta wadidda Rafcaanka

Haddii rafcaanluhu ka qayb geli waayo fadhiga hore, Maxkamaddu waxay dacwadda dib ugu dhigaysaa fadhiga soo socda, taasoo kaaliyuhu uu gaarsiinayo rafcaanlaha, haddii rafcaanluhu misna ka qayb geli waayo fadhiga cusub, Maxkamadda waxay caddeyneysaa oggolaansho la'aanta Wadidda Rafcaanka.

## Qodobka 239aad

Tillaabooyinka diyaarinta ee Maxkamadda Rafcaanka

Fadhiga ugu horreeya ee Garsooraha Rafcaanka u qabto dacwadda wuxuu hubsanayaa toosanaanta ka qayb galka dhinacyada, wuxuu amarayaa haddii loo baahdo, wiciida iska hor-keenidda dhinacyada iyo gaarsiinta dhinacyada kale, haddii ay jiraan, sida uu dhigayo Qodobka 70.

Haddii ay jirto arrinta lagu sheegay Qodobka hore, wuxuu caddeynayaa oggolaansho la'aanta wadidda Rafcaanka, sidoo kale wuxuu caddaynayaa maqnaashaha rafcaansanaha haddii uu imaan waayo, wuxuuna amar ku soo saarayaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee ku saabsan wadidda Dacwadda.

Goor kasta Garsooruhu isagoo amraaya imaanshaha dhinacyada haddii loo baahdo, waa inuu isku dayaa heshiisiinta dhinacyada dooddu ka dhexeyso.

Qodobka 240aad

Tillaabooyinka ku saabsan fulinta ku meel gaarka ah

Maxkamadda rafcaanka ayaa tillaabo ka gaareysa arjiga ku saabsan fulinta ku meel gaarka ah ama joojintiisa si waafaqsan Qoobka 199 qaybtiisa dambe.

Qodobka 241aad

Xukun u diridda

Markii ay bogto Maxkamadda rafcaanka diyaarinta dacwadda waxay qabanaysaa fadhi ay Dacwadda ugu direysa dhawaaq. fadhigaas ohexdiisa bayna dhinacyadu ku xaddidayaan weydiisyadocaa kama aambeysta ah ka dibna Dacwadda waxaa loo dirayaa xukun.

Qodobka 242

U celinta Dacwadda Maxkamadda Hoose

Uma bannaana Maxkamadda rafcaanka in ay Dacwadda u celise Maxkamadda Hoose haddii ayna helin wax keenaya burinta arrimaha ku saabsan dacwad furidda darajada hore ama aan la iska hor kenin dhinacyada darajada koowaad ama maqnaarshaha awoodda ama gaf ku saabsan caddaynta dhicidda dacwadda darajada koowaad ama warqad kasta ee ayna suurtoobeyn in lagu cusbooneysiyo Rafcaanka.

Qodobka 243aad

Ku dhaqmidda Qodobada ku saabsan Dacwadda darajada koowaad

Ayadoo laga reebayo inta lagu sheegay Qodobka 235, Garsooraha Rafcaanka markuu amraayo aqbalidda sugid cusub, wuxuu dhawrayaa Qodobbada ku saabsan dacwadda darajada koowaad.

Qodobka 244aad

Ku dhaqmidda Qodobbada Dacwadda darajada koowaad

Waxaa lagu dabbaqi karaa Dacwadda rafcaanka dhammaan qodobada loo qeybiyey Dacwadda darajada koowaad, haddii ayna a socoon karin Qodobbada madaxaan mooyee.